


Maansada: DHAKAFAAR JACAYL W/C: Sacdiyo Maxamuud Garcadde



Maansada: DHAKAFAAR JACAYL.Maansadan DHAKAFAAR waa maanso ka hadlaysa, Gabadh uu dersay jacayl, waxay la garnaqsanaysaa jacaylka, waxaanay raadineysaa, xalka iyo habka ugu fudud ee ay ku hanan karto, sida aad arki doonto waxay ku soo halqabsaneysaa Rag badan oo Hal abuur ah, dhinac walba oo bulshada ahna waxay weydiineysaa, Taageero bal sida ugu haboon, waa Maanso farshaxanimo iyo aqoon suugaaneed xeeldheeri ka muuqdo, Bogasho wacan. Dhibteyda ma sheegan karoDhiigaan iga daadan iyoDhaawaca ma dabooli karoDhaymiyo uma helin dawana. Dharaar socod baan wadaSaqdi waan dheelmadaNafteydu dhulkay degtaDhugteydu cirkey jirtaaDadkane wan dhaafsanaHayXiskuna waa dhaadan yahay. Dhammow adigaan dartaaDharaaraha uun tirshaaDhawaqaagaan maqlaaHaddane ma dhageeysan karo. Inaan ku dhugtaan rabaaHaddane kuma dhiiran karoSidii ubad aan dhalaanDhibaataada kaa jiraaDhabtane kuma saari karo! Dhanbaal u dhigbaan iraaDharaandhiri caashaqooKa dhaadhici baan is iri.Inaan dhiman rabo dartaaHaddane qalinkaan dhigmeyn! Ka dhoof caashaqaan dhabtaKa dheerow oo fogoowKa dhuumo naftaan iraa. Kalgacal laabtayda dhexdegayQalbiga lama dhaqi kareeHa dhabar jabin baan iraa. Naftaan dhacadiid la rabineDhaliisha hankaan duldhigeDhaayaha aragaan is iriArmeey dhibta kuu weceen. Dhagaha maqalkaan is iriDhageysigu waa sababeArmeey waran kugu dhufteen.Garashida dheerida nafluhuAadmiga dhaxal looga dhigeys iri dhuney oo anbayeSacdaay yaa ku dhaymi siin. Adoon aadmiga dhibeyninLa dhuumo jeceylka keliSidii uu yahay dhalaanLa dheel dheelbaan is iriDhamiirkuse dhaga adeyg. Go'aanka kama dhaadhacoInow dhinto kama baqdeAsoo dhurfayoow yiraahMaxaa dhaxama i surey?Dheeliga kali iigu wacan? Duxdeeda anoon dhadhaminDibaan uga dhawrsadaDhigaalo soo diraaSuugaan baan soo dhuraaDhanbaal gudbi baan iraaLa dheelmo naftaa tiraaMareegaha soo dhigooWaxaan oday dhaqan leheynugaasyada iigu dhiibHaddeysa ku dhiiradanFarriinta ka dhidhiyaanIleen dhaqan uma leheynIneey dumar gogol dhigtaanRagga dhaxalkaa lahaayeNafteyda maxaan dhahaa? Wariye dhaxda ii xertiyoAbwaano dhammaan kiciyoFannaaniin dhiiratooSugaanta ka dhahdaan rabaInaan dhuxul laabsalaaxHortiisa dhigaan rabaaDhibteyda jaceylka iyoXiddigaha geeska dhamiDhawaqa gaarsiiya ooDhacdadan u tebshaan raba Warbaahinta dheeg walbabaBiibiisadaa cod dheer(BBC)Fii, oo Ada dhex dhiga(VOA)Dhammaan warsidaha ku qoraKa dhaadhiciyaan rabaa. Waxaan ahay gabar dhibtoonDhaqanku waa soo jireeneAros dhaxdinlaan rabaaDhibkoo ninkaan u marey Yarkaan dhawr saniyo shiiJeceyl dhiddibada u suranDhaxyaal wadnaheyya ooNafteyda dhan wada gilgileyMidkii dhandhoolka badayHooyadi dhabta saartey iyoAabbihi dhaley baan rabaaDhulkii deexda iyo duurDhinaca jowhar iyo webiMareeg ka dhex raadiyoCaduurka dhulkii lahaaDhanka xarardheere iyoDhinaca ay iga jiraan. Inaan suugaan cod dheerDhawaqa ugu sheega eDhammaan shacabkeygiyowSoomalida dhiiga leheIlaah iga dhaliyayayoowWaalidka dhibta iga jireeDheeliga iga dhawrayoowWalaalaha ila dhashoowSaaxiibada dhaxal galkeeNafteydu ku dheertahoow. Dhammoow ina xaashiyoDhagajilac caaqilkoowDhiigayga IbraahimoowNafteydu ku dhaadatoIntii dhib jeceyl martayDhammaan ii wada kokoKu dhiirada sheekadaanDhakhsoo ka jawaaba ooDhanbaaliyo hees ka qoraDhankiina ayaan marshee.Halqabsiga.Xasan Dhuxul LaabsalaaxXasan Xaashi TimacaddeCabdirashiid Dhigajilic(Caaqilka)Ibraahim Cismaan Afrax (Nolosha)W/C: Sacdiyo Maxamuud Garcadde